



Reimagining Education During the Pandemic

**PORTLAND
PUBLIC SCHOOLS**



Guddoomiyaha Gobolku Brown Waxa ay Ku Dhawaaqday Ku Noqoshada Waxbarashada Ardaydu Qof ahaan Ugu Qaadanayaan Iskuulka, Ka Dibna Waxa ay Booqatay Dugsiga Hoose ee Sitton Iyada oo uu La Socdo Guddoomiyaha Waxbarashada Guerrero

Maarso 5, 2021

Qoysaska Qaaliga iyo Asxaabta PPS,

Waxaa sharaf noo ahayd maanta inaan ku soo dhaweynay Guddoomiyaha Gobolka Kate Brown Dugsiga Hoose ee Sitton inay [booqasho ku marto](#) fasaladeena waxbarashada kooban laga bixinayey iskuulka iyo inay fiiriso caafimaadka iyo tallaabooyinka nabadgelyada ee la meelmariyey iyada oo aan rajeyneyno in waxbarasho isku dhafan la bixin doono xilliga gu'ga. Waxaan u mahadcelineynaa maamulaheena Dana Nerenberg oo nagu martigalisay iskuulkeeda cajaa'ibka.

Horaantii maanta, [Guddoomiye Brown waxa ay ku dhawaaqday](#) in dhammaan iskuulada Oregon dib loo furi doono, ugu yaraan qaab waxbarasho oo isku dhafan marka la gaaro bisha Maarso aakhirkeeda (fasalada xannaanada caruurta ilaa fasalka 5naad) iyo bisha Abriil dhexdeeda (fasalada 6-12). PPS, iyo sidoo kale dhammaan iskuulada degmada ee Oregon, waxaad naga sugtaan waa faahfaahinta ku saabsan inta aan ku jirno qorsheena lagu meelmarinayo hawshan, iyada haatan hawshani laga soo shaqeynayey bilo, sidii aan u soo dhaweyn lahayn in ardaydeenu ku soo noqdaan iyaga oo nabadqaba lagana taageerayo jawiga barashada ee gu'gan.

Marka la eego miisaanka ay leedahay dhawaaqa maanta ka soo baxay Guddoomiye Brown, waa wax la fahmi karayo oo suurtagal ah inaad qabto walaac iyo/ama su'aalo, haddii aad tahay arday, macallin, xubnaha shaqaalaha ama xubnaha qoyska. Iyada oo ay na weheliyaan iskuulada degmooyinka ee gobolka, waxa aad naga sugtaan inaan idiin soo gudbino tilmaamaha dheeraadka ah ee ka imanaya guddoomiyaha iyo Waaxda Waxbarashada Oregon. Haddii aad tihiin bulshadayada PPS waa idinla wadaagi doonaa faahfaahinahaasi sida ugu degdeg badan ee ay na soo gaaraan.

Iyada oo aan ka warqabno maanta xanuunka saf mareenka ah ee COVID-19 blaabmay in ka badan sanad, qof kasta oo ka mid ah PPS wuxuu ka shaqeynaayey sidii loo gargaari lahaa ardaydeena iyo qoysaskeena, iyada oo la siinayo waxbarasho qaabka ugu degdeg badan ee suurtagal ah iyada oo la eegayo qiyaasaha caafimaad ee bulshada. Waxaanu si joogta ah ugu hawlaneyn qorsheynta sidii loo heli lahaa ugu dambeyn in iskuuladeena dib loo furo lahaa. Waxa uu yoolku ahaa inay iskuuladu noqdaan nabad, taxadarna la socdo iyo in xil la iska saaro faafitaanka xanuunkani, iyo iyada oo la gaaray waqtigii la bilaabi lahaa in badan oo ah ardaydeenu waxbarashadoodii ku qaataan fasalada dhexdooda. Iyada oo

la addeegsanayo habab nabadgelyo oo la raaco, waxa aan aaminsanahay inay ardaydu ka faa'iidi doonaan inay ku soo noqdaan iskuuladoodii iyaga oo mar labaad la kulmaya ardaydii saaxiibadood ee ay isku fasalka ahaayeen.

Waxaanu idiinka mahadcelineynaa inaad dabacsanaantiina, hal abuurnimadiina iyo fahamkeena mudda ka badan sanadka. Todobaadka soo socda waxaan idinla wadaagi doonaa waxyaabo fara badan oo ku saabsan iskuulada.

Waxaan idiin rajeyneynaaa nabadgelyo iyo todobaad wacan.